



Alaabta Guriga ee Halista leh

Dadka intooda badan waxa guriga u yaalaa kiimikooyin halis leh.



Alaabtaasi waxay khatar u tahay adiga iyo caruurtaada. Waxa laga yaabaa inay kuu yaalaan jikada ama madbakha, musqusha, qolka dhar-dhiqista ama geerashka.



Marka aad gudaha Maraykanka ka iibsatid alaab guri oo kiimiko ah waxa alaabta ku yaala qoraal sharaxaya inta halista alaabtu tahay. Haddii qoraalka ay ku qoran tahay “CAUTION” (oo ah TAXADIR) alaabtaasi wax yar bay halis tahay.




CAUTION

Haddii ay qoraalka ku qoran tahay “WARNING” (oo ah DIGNIIN) waa alaab ka sii halis badan ta hore.



WARNING

Haddii ay qoraalka ku qoran tahay “DANGER” (oo ah KHATAR) ama “POISON” (oo ah SUN) alaabtaasi aad bay halis u tahay.



DANGER POISON

Waxa adiga iyo deegaanka u fiican in aanad isticmaalin alaab halis leh. Haddii ay qasab kugu tahay inaad isticmaashid alaab halis leh, dooro alaabta ugu halis yar ee shaqada kuu qaban karta.



CAUTION **DANGER** **WARNING**
Least Hazardous

Waxa kale oo qoraalku kuu sharaxyaa sida alaabtu cudur kuugu ridi karto ama kuu dili karto. Haddii qoraalka ay ku qoran tahay ereyada “vapor harmful” (oo ah naqaskeedu waxyeelo ayuu leeyahay” ama “harmful if inhaled” (oo ah waxyeelo ayay leedahay haddii la neefsado”, alaabtaa haddii aad neefsatid waxyeelo ayay ku gaadhsiin kartaa.



Haddii qoraalka ay ku yaalaan ereyaga “poison” (oo ah sun) ama “harmful or fatal if swallowed” (oo ah waxyeelo ayuu leeyahay ama geeri buu keeni karaa haddii la liqo), alaabtaasi waxyeelo ayay ku gaadhsiin kartaa haddii aad si aan ku-talogal ahayn u cuntid ama u cabtid. Gacmahaaga dhaq ka dib marka aad isticmaashid alaabtaa.



Haddii qoraalka ay ku yaalaan ereyada “harmful if absorbed through the skin” (oo ah waxyeelo ayuu leeyahay haddii uu kaa galo maqaarka) alaabtaasi waxyeelo ayay ku gaadhsiin karta iyada oo ka gudbaysa maqaarkaaga.



Qasab ma ah inaad fahamtid erey kasta oo ku yaala qoraalka si aad u ogaatid in alaabtu halis leedahay. Haddii alaabtu sun tahay waad ku bukoon kartaa ama xiitaa way ku dili kartaa. Haddii qoraalka ay ku yaalaan “poison” (oo ah sun), “harmful or fatal if swallowed” (oo ah waxa uu leeyahay waxyeelo ama geeri haddii la liqo), ama “harmful if inhaled” (oo ah waxyeelo ayuu leeyahay haddii la neefsado) ama “harmful if absorbed through the skin” (oo ah waxyeelo ayuu leeyahay haddii uu maqaarka kaa galo) alaabtaasi waa sun.

**POISON
HARMFUL OR FATAL IF
SWALLOWED,
INHALED,
OR ABSORBED
= TOXIC**


Haddii alaabtu tahay mid ololi karto si fudud ayay ku bilaabi kartaa inay gubato. Haddii qoraalka ay ku yaalaan ereyada “combustible” (oo ah guban kara), ama “inflammable” (oo ah ololi karta), ama “contains petroleum distillate” (oo ah waxa ku jira baatrool wax laga sameeyay) ama “keep away from fire, heat or flame” (oo ah ka fogee dabka, kulaylka ama lolka) alaabtaasi waa mid ololi karta.

COMBUSTIBLE
INFLAMMABLE
PETROLEUM DISTILLATE
KEEP AWAY FROM FIRE,
HEAT OR FLAME
= FLAMMABLE

Haddii alaabtu tahay mid wax jaraysa ama milaysa waxay gubi kartaa maqaarkaaga ama indhahaaga. Haddii ay qoraalka ku yaalaan ereyada “acid” (oo ah asiidh ama aashito), ama “lye” (oo ah nooc asiidh), ama “alkaline” (oo ah alkaliin), ama “burns skin” (oo ah waxa uu gubayaa maqaarka), ama “burns eyes” (waxa uu gubayaa indhaha) alaabtaasi waa mid wax jaraysa ama milaysa.

ACID
LYE
ALKALINE
BURNS SKIN
BURNS EYES
= CORROSIVE

Haddii ay qasab kugu tahay inaad iibsatid alaab halis leh ha iibsan wax ka badan inta aad u baahan tahay. Waxa fiican inaad dhamaanteed u isticmaashid ulajeedadii loogu talagalay, halka ay qayb kuu hadhi lahayd taasoo qasab kaaga dhigaysa inaad meel ku kaydisid ama aad geysid goob gaar ah si looga takhaluso.



Haddii aad u baahatid inaad ka takhalustid alaab halis leh oo gurigaaga taala, ha ku ridin qashinkaaga ama ha ku shubin saxanka biyaha. Si aad u fahamtid sida looga takhaluso alaab halis leh oo taala gurigaaga, warka u gaar ah degmadaada ka eeg barta www.GreenGuardian.com.

